

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Impetigo

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu qaaday **impetigo**. Waa infakshan maqaarka ku dhaca.

Waa maxay astaamuhu? Cuncun, nabarro dheecaan ka socdo ama qolof leh (nabarro furan) kuwaasi oo xajmi ahaan iyo qaab ahaan kala duwan. Sida badan waxay ka muuqdaan wejiga, laakiin waxay ka muuqan karaan meel kasta oo jidhka ah.

Sidee ayey ku faaftaa? Iyada oo toos loo taabto nabarka furan ee qofka xanuusan ama oogooyin wasakhaysan.

Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan? 1-5 maalmood kadib qaadista.

Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo? Haa, ilmuhu waxa dhici karta inuu ku laabto dugsiga kadib 24 daawayntu marka ay bilaabantay iyo qoraal ka socda bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga oo sheegaya daawayntu inay bilaabantay.

Haddii ilmahaagu uu yeesho astaamahan fadlan ka raadso baadhis iyo daawayn bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga. Fadlan ku wargeli xarunta ilmaha ee Head Start/ECEAP haddii ilmahaaga laga helay cudurkan.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____